

WARARKA ILAALINTA BII'ADA

Seattle City Light waxay Maalgalinaysaa Cilmi Baarista ee Hoos udhaca Barafka

Seattle City Light waxay dhamaan maalgalisay daraasad lagu baaray laguna cabiray hoos udhaca qaybaha dhagaxaanta barafka ee gobalkeena. Majalada daraasada ah, oo ciwaankeedu yahay “Glacier Recession and the Response of Summer Streamflow in the Pacific Northwest United States, 1960–2009,” ayaa baaritaan kusamaynaaya hoos udhaca dhawaanahaan kudhacay dhagaxaanta barafkaan kaasoo dhalaalkiisa iyo biyaha kasoo burqada ay saamayn karaan korontada biyaha laga dhaliyo, ilaha biyaha beeraha iyo caafimaadka bii'ada ee geedaha biyaha kudaahan. Marka laga reebo inay qayb kamid ah cilmi baarista maalgalinayso, City Light waxaa loosheegay xajmiga mashruuca si digniin looga baxsho marka daadadku ugu muhiimsan yihiin dhalinta korontada, dabaasha iyo difaaca kaluunka.

Ayadoo la adeegsanaayo naqshadaynta cilmiga korontada biyaha, daraasadu waxay ogaatay in aasaasiyan dhalaanka dhagaxaanta barafka ee cimilada kulul kadhaha uu sii badan doono inta lagu jiro qarnigaan oo dhan. Naqshada ayaa muujinaysa in dhagaxaanta barafka ee Cirifka Waqooyi uu kudhawaad gabi ahaanba baabi'i doono marka lagaaro sanadka 2100 haddii aan wasaqaynta gaaska cagaaran lajoojin.

Ronda Strauch, oo ah cilmi baare iyo lataliye dhanka isbadelka cimilada ah oo katirsan City Light, cilmi baaristaan waa mid muhiim ah oon kaliya kukoobnayn caafimaadka dhagaxaanta barafka ee laakiin sidoo kale wuxuu qaabeeyaa sida qalabka korontada kadhaliya biyaha sida City Light ay usii wadi doonaan shaqooyinkooda mustaqbalka.

“Waxaan usamaynaa cilmi baaristayada noocan oo kale ah si aan usamayno qiyaasta mustaqbalka qulqulada kaydka korontada iyo cadadka korontadaha biyaha laga dhaliyo ah ayay awoodi doontaa shirkadeenu,” Ronda ayaa sharaxaaya. “Waxaan doonaynay inaan xaqiijino in shaqada dhagaxaanta barafka lagu daro naqshadaan korontada biyaha laga dhaliyo ah ee loo adeegsaday cilmi baaristaan si aan sawir buuxa uga qaadano daadadka kusoo qulqulaaya kaydkeena. Tani waxay naga caawinaysaa inaan kahortagno caqabadaha mustaqbalka fog ee dhagaxaantaan barafka oo dhalaalaaya.”

Si aad u akhrido qaybaha kale ee sheekadaan, baar erayga “glacier research (cilmi baarista dhagaxaanta barafka)” adoo kuqoraaya barteena Powerlines korontada oo ah powerlines.seattle.gov.

GEESKA KIRAYSTAHA

Korontada Talaagada

Wali ma iskudayaysaa qaabab aad kuyarayso tamarta aad isticmaasho? Fiiri talaagadaada! Halkaan waxaad kahelaysaa dhawr tallooyin oo ka timid U.S. Department of Energy* (Waaxda Mareykanka ee Tamarta)* kuwaasoo kubaraya qaabka aad kutashiili karto korontada talaagadaadu cunto:

- Haka dhigin talaagadaada ama qaboojiyahaaga mid aad uqaboow.
- Xaqiiji in albaabka talaagadaadu xiran yahay aysana galin dabayl.
- Dabool dareerayaasha oo xir cuntooyinka kujira talaagada. Cuntooyinka aan ladaboolin waxay siidaayaan qoyaan waxayna adkaynayaan shaqada mashiinka talaagada.

Si aad u hesho tallooyin lagu keydiyo lacag iyo tamarta, booqo

seattle.gov/light/renterscorner.

*Isha: energy.gov/energysaver/appliances-and-electronics/kitchen-appliances

Wax qabadkii 2018: Kaarkeena Warbixinta

Cabirada waxqabadka Seattle City Light waxay muujisaa sida aan u sameynay gaarista hadafyadeena 2018. Waxaan ballan qaadnay hormarino joogta ah ee 2019 iyo dhaafsan.

HADAFKA 2018

Boqolkiiba wacitaanada lagu jawaabo gudaha 60 ilbiriqsi (Xarunta Wacitaanka oo ay maamulaan Seattle Public Utilities (SPU, Shirkada Adeegyada Bulshada Seattle)

Bartilmaameedka 80%

Wax qabadka 65%

Xawaaraha go'aanada korontada ee aan horay loosii qorshayn (geedaha leemanka ku jiro, guuldarada qalabka, iwm) mudo daqiiqado gudaheed, sanaadkiiba, macmiilkiiba

Bartilmaameedka 0.4500

Wax qabadka 0,5015

Baaxada korontada maqneyd ee aanan la qorsheyn daqiiqado ahaan macaamil kastaba, sanaadkiba

Bartilmaameedka 62.5

Wax qabadka 58.3

Tirada weydiinta ee 1,000-kii macaamilba

Bartilmaameedka 4

Wax qabadka 12.85

Boqolkiiba qaladaadka biilka

Bartilmaameedka 2%

Wax qabadka 2%

Tiradda maalmo ahaan ee ay qaadato in lagu sameeyo heerka deegaanka/kariirada korontada ee ganacsiyada aryar kuwaasoo ubaahan adeegga goobta

Bartilmaameedka 40

Wax qabadka 39

Hagaajinta nalalka jidadka, ku jawaabida gudaha 10 daqiiqo maalmaha shaqada

Bartilmaameedka 90%

Wax qabadka 89%

Keydadka illaalada macmiilka ee dhammaan kooxaha macamiisha (celceliska megawatts)

Bartilmaameedka 12.25

Wax qabadka 14.41

Yareynta/joojinta wasaqaynta hawada gaaska cagaaran

Bartilmaameedka 100%

Wax qabadka 100%

Jarida dhirta u dhaw leemanka dabka si kor loogu qaado iskuhalaynta (oo miles ah)

Bartilmaameedka 420

Wax qabadka 373

Tilmaanta Badqabka

“Anagoo adeegsanayna ‘Snowmageddon’ ee kujira muraayad haadkeena, hadda ayaa ah waqtiga kuhaboon ee naftayada iyo qoysaskeenaba udiyaarino qorshayaal. City of Seattle waxay bixinaysaa adeegyo si gacan looga gaysto sidaad ku adeegsan lahayn barta seattle.gov/emergency.”

-Bryan Hovde

Lataliyaha Xeelada Maaraynta ee Xaaladaha Degdega ah

Skagit Tours Ilaalinta ayaa Furmayasa Dhawaan!

Kaalay sahmi quruxda iyo tacaburka ay River Skagit bixinayso! Dhigaalada xagaagan ee Skagit Tours waxay furmayaan Abriil, markaa hore u sii hel tigidyadaada. Wixii warbixin dheeraad ah booqo SkagitTours.com.

Isbadelo ayaa ku imaanaaya qaabkaaga lacag bixinta eBilling!

Waxaan kor qaadaynaa qaabka aad ubixino biilalkaaga City Light iyo SPU oonleen ahaan, ayna kujiraan sharciga lacusboonaysiiyay ee hoyga Americans with Disabilities Act (ADA, adka Ameerikaanka ah ee Naafada ah) iyo dookha aad uhaysato inaad hesho fariimaha qoraalka. Xaqiiji inaad kalasocoto Seattle City Light baraha bulshada

Ka Shaqeynayo Aaga Xaafadaada

Kooxda Seattle City Light waxay joogaan xaafadahaan, ayagoo kashaqaynaaya bixinta adeegyo waxtar leh:

- Arroyo/South Arbor Heights: Gelinta fiilooyin dhulka hoostiisa, saqafyada iyo nalalka wadooyinka ee lagu badelaayo kaabayaal aan dhamaaneen;
- Judkins Park: waxaan rakibaynaa aana badalaynaa baalayaasha, fiilooyin cusub ayaan keenaynaa, iyo qalab cusub si aan kor ugu kaadno iskuhalaynta korontada;
- Pioneer Square: Kordhinta helitaanka korontada iyo taageerida dib ubeerida geedaha ayadoo kuwa dhamaaday, xididada hoose kaxumaaday meesha laga saaraayo;
- Snohomish County: waxaan rakibaynaa fiilooyinka laymanka wax gudbiyo oo cusub iyo qalabka udhaxeeya xarunta hoosaad si kor loogu qaado kalsoonida shirkada;
- South Lake Union: Rakibida saqafyo iyo marinada biyaha si macaamiisha loogu xiro kaabayaasha korontada dhulka hoostiisa ee Denny Substation.

Kan waa liis aan dhamaystirneen. Haddii aad rabto sharaxaad booqo seattle.gov/light/atwork si aad hesho qariiradeena aad waxbadan uga barato mashaariicda gaarka ah.

Kusoobiir Golaha Macaamiisha ee Seattle City Light

Ma doonaysay inaad fikirkaaga kadhiibato bii'ada, mustaqbalka tamarta, biilkaaga, ama adeegyada Seattle City Light? Waxaan dhisnay Golaha Macaamiisha si aan kugu fududayno in codkaaga lamaqo. Haddii aad xiisaynayso inaad noqoto qayb kamid ah Golaha Macaamiisheena, booqo CityLightCustomerForum.com si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah aadna xubin uga noqoto.

Guud Ahaan Macno Ayay Samaynaysaa

Ma xukuntaa isticmaalkaaga tamarta?

Sidee isticmaalka tamartaada u saameyn kartaa biilkaaga? Hagaag, waa sida ibsiiga qudaarta. Adiga ayaa go'aaminaya waxa ku jira gaari-gacankaaga. Shay kasta wuxuu noqon karaa keliya dhowr dollar, laakin ku rid dhamaan gaari-gacankaaga GUUD AHAAN MACNO AYAY SAMAYNAYSAA!
energysolutions.seattle.gov/your-home/ways-to-save